Casharka 11

-Bilowgii, halkee bay Aadan iyo Xaawo ku noolaayeen?
-Waxay ku dhex noolaayeen beer Ceeden.

-Markii ay Beer Ceeden joogeen, Aadan iyo Xaawo sidee bay dareemi jireen?
-Aadan iyo Caawo aad by u faraxsanaan jireen.

-Maxay Aadan iyo Xaawo u faraxsanaan jireen?

-Waayo Aadan iyo Xaawo ilaah bay la socon jireen.
-Waayo Aadan iyo Xaawo waxay haysteen waxkasta ee ay u baahnaayeen.

-Laakiin, halkee buu Shayddaanka, oo ah cadowga Ilaah joogi jiray?

-Shayddaanka wuxuu daawanayey Ilaah markii uu abuurayey Aadan iyo Xaawo.

-Shayddaankaa wuxuu garanayey in Ilaah wax waliba ee dhulka yaalla uu Aadan madax uga dhigay, markaasuu carooday.

-Shayddaankuna wuxuu nebcaaday Ilaah.
-Shayddaanku wuxuu garanayey inaanu awood u lahayn inuu ilaah ka adkaado.

-Sababtaas aawadeed, Shayddaanku wuxuu goostay inuu wiiqo Aadan iyo Xaawo.

-Sababtaas aawadeedn, Sahyddaanku wuxuu go'aan ku gaaray inuu



burburiyo Aadan iyo Xaawo.

-Sidee bay kula tahay in Shayddaanku isugu taxluujiyey inuu Aadan iyo Xaawo burburiyo?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:1

1-Haddaba abeesadu way ugu khiyaano badnayd bahal ksta oo duurka jooga oo Rabbiga Ilaaha ahu sameeyey. oo waxay Naagtii ku tidhi, Ilaah miyuu idinku yidhi, Waa inaydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?

-Miyaa abeesadu xaqiiqo ahaan la hadlaysay naagta/
-Maya.
-Yaa la hadlayey Xaawo?
-Shayddaanka.

-Miyaa Xaawo garanaysa in waxa la hadlayaa uu Shayddaanka yahay?
-Maya.
-Shayddaanku wuxuu soo dhex-galay Abeesada.

-Muxuu Shayddaanku u soo dhex-galay Abeesada?
-Inuu isku dhex qariyo darteed.

-Muxuu Shayddaanku isugu dhex-qariyey abeesada?
-Waayo Shayddaanku wuxuu doonayey inuu dabin u noqdo Xaawo.

-Waayo Wuxuu kaloo Shayddaanku doonayey inuu khiyaameeyo Xaawo.

-Waayo Shayddaanku wuxuu doonayey ama ku taamayey inuu Xaawo burburiyo.
-Bal aan idiin sharraxo.

-Markii nin ugaarsade ah uu doonayo inuu dabin u dhigo ugaadha, miyaanu iska qarinin ugaadho uu doonayo inuu soo dabo?
-Haa.
-Maxaa dhaaya marka aanu iska qarinin?
-Sooma helayo ugaar.

-Isla sida ugaarsaduhu isku qariyo markuu ugaarsanayo, ayaa Shayddaankuna is-qariyey si uu ku soo dabo Xaawo.

-Miyaa Shayddaanku isku dayaa inuu dadka maanta gacangeliyo?
-Haa.
-Sidee buu Shayddaanku maanta ku gacangeliyaa oo khiyaamiyaa dadka?

-Marka kowaad, Shayddaanku wuxuu la hadlaa maankeenna.
-Marka labaadna wuxuu ka dhex hadlaa dadka kale.

-Marka saddexaadna, Shayddaanku wuxuu inagala dhex-hadlaa jinniyada.

-Marka kowaad, Shayddaanku wuxuu inagala dhex hadlayaa maankeenna.

-Mararka qaarkood, Shayddaanku, figrad ayuu maskaxdeenna geliyaa.

-Waxaynu u malaynaynaa in fikirku keenna yahay, laakiin waa fikirro Shayddaanku geliyey maankeenna.



-Shayddaanku wuxuu inoo sheegayaa inaynaan rumaynin Hadallada Ilaah.

-Fikirradaasuna kama imanin Ilaah.
-Fikirradaas waxaa maankaaga soo geliya Shayddaanka.

-Tan labaad, Shayddaanku dadka kale ayuu inagala dhex hadlaa.

-Dadka kale waxay kuugu oran karaan Ha dhegaysan Hadallada Ilaah.

-Fikirkaasi Ilaah kama imanin.
-Fikirkaasu waa mid Shayddaanku geliyey maskada qof kale.

-Dadka kale waxay kuugu oran karaa, 'Waxaan leennahay rumaysadkeenna, markaana uma baahnin rumaysadkaas cusub.

-Fikirkaasina kama imanin ilaah.
-Fikiraasuna waa fikir Shayddaanku geliyey maskaxda qofka kale.

-Tan saddexaad, Shayddaanku wuxuu inagala dhex hadlayaa jinniyada..
-jinniyadu waxay la hadleen kuwii aad ka soo farcantay.

-Jinniyadu waxay kuwii aad ka soo farcantay u sheegi jireen inay ilmahooda dab geliyaan, oo sidaas bay yeeleen.

-Fikirkaasu ilaah kama imanin.
-Fikirkaasu waxaa maanka kuwii aad ka soo farcantay geliyey Shayddaanka iyo jinniyadiisa.

-Miyaa Xaawo garatay in Shayddaanku la hadlay iyaga?

-Maya.

-Xawo ma aysan garanaynin in Shayddaanku la hadlayo iyada.
-Waayo Shayddaanku wuu is-qarinayey qudhiisu.

-Farcankeennii hore ma aysan ogayn in Shayddaanku la hadlayo iyaga.
-Waayo Shayddaanku wuu is-qariyey.

-Shayddaanka qudhiisa ayaa dabin u dhigay oo khiyaaneeyey Xaawo.
-Shayddaanka wuxuu isku qariyey inuu dabin u dhigo oo khiyaameeyo farcankaaga.

-Maxaa Shayddaanku u doonayey inuu dabin u dhigo oo khiyaameeyo Xaawo?

-Waayo Shayddaanku wuxuu nebcaa Xaawo.
-Waayo Shayddaanka wuxuu doonayey inuu burburiyo Xaawo.

-Waa maxay sababta Shayddaanku u doonayey inuu dabin u dhigo oo khiyaameeyo farcankeenna.

-Waayo Shayddaanku wuxuu neceb yahay dadka oodhan.
-Waayo Shayddaanka wuxuu doonayaa inuu burburiyo dadka ood han.

-Bal aynu mar kale akhriyo su'aasha Shayddaanku weyddiiyey Xaawo.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:1



1-Haddaba abeesadu way ugu khiyaano badnayd bahal kasta ood uurka jooga oo Rabbiga Ilaah ahu sameeyey. Oo waxay naagtii ku tidhi, Ilaah miyuu idinku yidhi, Waa inaydaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?

-Maxaa Shayddaanku su'aashan u weyddiinayaa Xaawo?
-Shayddaanka wuxuu horey u garanayey wixii Ilaah yiri.
-Shayddaanka wuxuu horey u garanayey in Ilaah u sheegay iyaga inaanay waxba ka cunin Geedka aqoonta Wanaagga iyo xumaanta.

-Waa maxay sababta Shayddaanku Xaawo u weyddiinayo su'aashan?

-Shayddaanka wuxuu su'aashan u weyddiiyey si uu dabin ugu dhigo Xaawo.
-Shayddaanku wuxuu su'aashan u weyddiiyey Xaawo inuu khiyaameeyo.
-Shayddaanku wuxuu su'aashan u weyddiiyey Xaawo inuu burburiyo.

-Bal aynu akhrinno jawaabtii Xaawo:

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:2-3

2-Naagtiina waxay abeesadii ku tidhi, Midhaha geedaha beerta waannu cuni karnaa.
3-Naagiina waxay abeesadii ku tidhi, midhaha geeddaha beerta waannu cuni karnaa, Laakiinse mihdaha geedka beerta dhexdeeda ku yaal, Ilaah wuxuu nagu yidhi, Waa inaydnaan waxba ka cunin, ama aydnaan taaban, yaydnaan dhimanine.

-Ilaah ma oranin Aadan iyo Xaawo ha taabanina miraha.

-Ilaah wuxuu ku yiri oo keliya, miraha geedka waa inaydaan cunin.

-Kitaabka Ilaah, waxaan ka akhrinnaa in Ilaah Aadan oo keliya ku amray inaanu cunin miraha.

-Welibana amarradii siiyey Aadan waa amarradii Ilaah siiyey Xaawo.

-Inkastoo loo qoray dadkii noolaa sannado badan ka hor, haddana Hadallada Ilaah waxaa loo qoray kuweenna maanta nool.

-Ilaah hal farriin oo keliya uma hayo dadka madow, oo farriin kalena uma hayo dadka caddaanka ah.

-Ilaah farriin uma hayo Afrikaanka, farriin kalena reer yurub.
-Ilaah farriintiisa waa isku mid oo waxaa leh dadka oo dhan.

-Farriinta Ilaah waa isku mid Shallay, maanta, iyo weligeed.

-Maxaad u malaynaysaa in Shayddaanku ugu jawaabay Xaawo?

Bal aynu akhrinno Bilwogii 3:4-5

4-Abeesadiina waxay naagtii ku tidhi, Ma dhiman doontaan.
5-Waayo, ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaan, oo aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale'idinkoo kal agaranaya wanaagga iyo xumaanta.

-Maxaa Ilaah u sii sheegay Aadan inay ku dhacayaan haddii uu wax ka cuno Geedak Aqoonta Wanaagga iyo Xumaanta?



-Way dhimanayaan.

-Maxaa Shayddaanku u sheegay Xaawo inay ku dhacayaan haddii ay wax ka cunto geedka Aqoonta Wanaagga iyo xumaanta?
-Inaanay dhimanaynin.

-Ilaah wuxuu ku yiri Aadan iyo Xaawo way dhimanayaan haddii ay cunaan miraha.

-Shaydaanku wuxuu yiri Aadan iyo Xaawo ma dhiman doonaan haddii ay cunaan miraha.

-Yey kula tahay inuu runta Sheegayo, Ma Ilaah mise Shayddaanku?
-Ilaah.

-Shayddaanku wuxuu leeyahay wixii Ilaah yiri, run maahan.
-Shayddaanku wuxuu Ilaah ugu yeerayaa beenaale.

-Maxaa kale ee Shayddaanku u sheegay inay xaawo ku dhacayaan haddii ay cunto Geedka Wanaagga iyo Xumaanta?

-Shayddaanku wuxuu yiri waxay la mid noqonayaan Ilaah.

-Miyaa dadku Ilaah oo kale noqon karaan?
-Maya.  Ilaah oo keliya ayaa Ilaah ah.

-Shayddaanka been buu sheegayey markii uu Xaawo u sheegay inay Ilaah la mid noqon doonto.

-Bilwogii, Shayddaanka wuxuu addeeci waayey Ilaah.
Imminka, Shayddaanka wuxuu doonayaa in Xaawo ay Ilaah adeeci

weyso.

-Ilaah dadka uma abuurin inay ku noolaadaan waxa dadku u sheego.
-Ilaah wuxuu dadka u abuuray inuu ku noolaado hab waafaqsan waxay Ilaah leeyahay.

-Ilaah dadka uma uumin inay ku noolaadaan Sharciyadooda.
Ilaah wuxuu dadka u uumay inay ku noolaadaan sharciyada Ilaah.

-Maxay kula tahay in Xaawo ay samaysay/
-Miyaa Xaawo ay adeecday Ilaah, mise shayddaanka ayey maqashay?

Bal aynu akhrinno Bilwogii 3:6

6-Oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed lood oonayo in caqli lagu yeesho, ayay midho ka qaadatay, oo cuntay; ninkeedii la joogayna wax bay ka siisay, oo isagiina wuu cunay.

-Shaddaanka wuxuu khiyaaneeyey Xaawo, Xaawana waxay rumaysatay Shayddaanka.

-Xaawo waxay adeeci weysay Ilaah, oo waxay cuntay mirihii.
-Aadan qudhiisuna wuxuu adeeci waayey Ilaah, oo wuxuu cunay mirihii.

-Aadan iyo Xaawo waxay maqleen Shayddaanka.
-Aadan iyo Xaawo ma aysan maqlin Ilaah.

-Aadan iyo Xaawo waxay addeeci waayeen Ilaah.



-Aadan iyo Xaawo waxay ku dembaabeen Ilaah.

-Maaddaama ay Aadan iyo Xaawo ku xad-gudbeen Ilaah, waxay noqdeen cadowga Ilaah.

-Waayo Aadan iyo Xaawo waxay maqleen Shayddaanka, oo waxay noqdeen cadowga Ilaah.

-Tusaale aan idin siiyo:

-Haddii saaxiibbadaa kaa soo cararaan oo ay raacaan cadowgaaga, doonaya inuu adiga ku dilo, miyaanay saaxiibbadaa noqonin cadowgaaga?
-Haa.

-Maaddaama Aadan iyo Xaawo ay Ilaah dib uga noqdeen, waxay noqdeen cadowgii Ilaah.

-Maaddaama Aadan iyo Xaawo ay raaceen Shayddaanka, waxay noqdeen cadowga Ilaah.

-Maxaa kaloo dhacay kaddib markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:7-8

7-Oo labadoodiiba indhahoodii way furmeen, oo waxay garteen inay qaawan yihiin; waxayna isku tosheen caleemo berde, oo ay gunti ka samaysteen.
8-Oo waxay maqleen codkii Rabbiga Ilaaha ah, iyagoo beerta dhex socda kolkii maalintu qaboobayd: oo ninkii iyo naagiisii way iska qariyeen Ilaah, oo waxay ku dhuunteen geedihii

beerta dhexdooda.

-Ka dib markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, maxay arkeen?
-Waxay arkeen inay qaawan yihiin.

-Ka dib markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, maxay sameeyeen markii ay arkeen inay qaawan yihiin?
-Waxay dhar ka samaysteen caleemo.

-Kaddib markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, maxay sameeyeen markii ay maqleen codkii Rabbiga oo u yimid inuu iyaga arko?

-Waxay iska qariyeen Ilaah.
-Ma suuragal baa in Ilaah aad iska qarisaan?
-Maya.

-Maxaanay suuragal u ahayn in Ilaah layska qariyo?
-Ilaah meel waliba ayuu joogaa.

-Markii hore, Aadan iyo Xaawo Ilaah bay heshiis la ahaayeen?
-Imminkana, Aadan iyo Xaawo waxay noqdeen carruurtii Shayddaanka.

-Markii hore, Aadan iyo Xaawo waxay la socon jireen Ilaah.
-Balse haatan, Aadan yo Xaawo waxay noqdeen carruurtii Ilaah.

-Markii hore, Aadan iyo Xaawo waxay la socdeen Ilaah.
-Imminka Aadan yo Xaawo waxay iska qarinayaan Ilaah.

-Markii hore, Aadan iyo Xaawo waxay raaci jireen  Ilaah.
-Imminka, Aadan iyo Xaawo waxay raaceen  Shayddaanka.



-Markii hore, Aadan iyo Xaawo ma ayan garanaynin Xumaanta.
-Imminkase, Aadan iyo Xaawo waxay garanayaan Xumaanta.

-Markii hore, Aadan iyo Xaawo ma ayan xishoonaynin.
-Imminka, Aadan iyo Xaawo way isku xishoonayaan.

-Kuma ayuu Shayddaanku neceb yahay?
-Shayddaanku wuxuu neceb yahay Ilaah iyo dadka oo dhan.

-Shayddaanku wuxuu kaloo neeb yahay dadka oodhan, oo wuxuu isku dayayaa inuu burburiyo dadka oo dhan.

-Miyaa Shayddaanku doonayaa inaad maqasho Hadallada Ilaah?
-Maya.
-Muxuusan Shayddaanku u doonaynin inaad maqashid Hadallada Ilaah?

-Waayo Shayddaanku wuxuu neceb yahay dadka oodhan, oo wuxuu doonayaa in dadka oodhaniba galaan Harada dabka ah ee aan damaynin.

-Haddii aad maqashaan Hadalldda Ilaah, waxaad baranaysaan sida looga baxsado harada dabka aan damayn.

-Haddii aadan maqlin Hadallada Ilaah, ma baran doontid sida looga baxsado Harada dabka aan damayn.

-Ilaah wuxuu doonayaa inaynu dhegaysanno Hadalladiisa.
-Shayddaanku dooni maayo inaad maqashid Hadallada Ilaah.

-Waxaan rajaynayaa inaad maqli doonto Hadallada Ilaah.